**SHARCI Lamb. 15 EE 25 JUUN 1956:**

**DORASHOOYINKA MAAMULADA**

**MAAMULAHA**

KADIB markuu aqoonsaaday ansixidda Golaha Sharci Dejinta

**WUXUU AMRAY SOONA SAARAY**

Sharcigaan halkaan ku xusan:

## CINWAANKA 1AAD

Tilmamaaha Guud

### Qod. 1
### Qaababka guud ee dorashooyinka

Xubnaha Maamulka Dowladda Hoose waxaa lagu soo dooranaya qof iyo cod.

Codeeye kasto wuxuu leeyahay 1 cod wuxuuna ka dooranaya ciddi oo uu codeyn lahaa liiska musharaxiinta ee goobaha xeendaabka dorashooyinka la soo bandhigay.

Codeyntu ma mid xor ah, toos ah qarsoodina noqon karo.

Tirada meteelada Maamulka Dowladda Hoose waxaa lagu sal gooyey tirade codadka liis kasto oo lagu xisaabiyey tiro dheeraadka.

Doorasho kama dhici karto goobaha la keeno hal liista keliya oo cid la tartaanta aysan jirin.

### Qod. 2
### Goobaha dorashooyinka

Dhulka Maamulka dowladda hoose wuxuu yahay goob doorasho.

### Qod. 3
### Xubnaha doorashada

Goobaha dorashooyinka waxay yeelan doonaan xarumo ah Xafiika dorashooyinka ee goobaha xeendaabka doorashooyin oo saldhigodu noqon doono caasimadaha dowladda hoose.

Degmo kasto waxay yeelan doonta Xafiiska dorashooyinka oo saldhigiisu noqon doono caasimada maamulka dowladda hoose.

### Qod. 4
### Taariikhda iyo muddada dorashooyinka

Doorashooyinku waxaa lagu iclaami doonaa dekreeto ka soo baxay Wasiirka Arrimaha Gudaha inta aanan la gaarin ama aanan ka dambeynin 30 beri maalinta la kala diray Maamulka Dowladda Hoose.

Muddada doorashooyinku waa hal beri.

Taarikhda doorashooyinku kama hormari karaan 90 beri kamana dambeyn karaan 120 beri kadib markii dekreetadasi lagu soo bandhigay Faafinta Rasmiga.

**Qod. 5**
**Waajibaadka Gudashada Coddeynta**

Cod bixintu waa waajib muwaadinimada la xiriirtaa waana waajib in la guto.

**Qod. 6**
**Sacaadaha howlaha adeega dorashooyinka**

Sida loo hirgaliyo howlaha doorashooyinku waxay Xafiisyada Degmooyinka iyo kuwa Maamul kasto ee Dowladda Hoose waxay furnaan doonaa maalin kasto ee 75ta beri ee ka horreysa dorashooyinka 7,30 ilaa 12,30 iyo 16:30 ilaa 18; maalmaha fassaxa ahna waxaa la furi doona 7,30 ila 12:30 oo keliya.

Maalinta ay dorashooyinka la qaban doono xafiiyadaasi waxay si joogta ah u furnaan doonana laga bilaabo sacadda 6 ilaa ay ka dhamaato howlaha dorashooyinka.

**CINWAANKA 2AAD**
Cidda la Dooran Karo

**Qod. 7**
**Shuruudaha murrashaxa**

Waxaa loo dooran karaan xubin Maamulka Dowladda Hoose, qof kasta oo Somali ah, lab ama dheddig oo leh tilmaamaha hos ku qoran:

1) Waa in magaciisa iyo tilmaamaha shaqsiyeed laga heli karaa xafiiska qoyska 90 beri ka hor maalinta doorashada;
2) In uu jiro 18 sano sanadkaa ay doorashada la qaban doono;
3) Waa in uu aysan xukun xariimaad ah ku dhicin oo ka hortgaan;
4) Waa in uu xarig.

**Qod. 8**
**Buxiinta liiska guud ee murrashaxiinta**

75 beri gudahooda ka hor intii uusan doorashoyinka aysan dhicin, iyadoo la tiigsaday tirakoobka dadweynaha, Duqa Magalada wuxuu soo buxin doona liiska guud ee murashaxiinta.

Liiskaasi wuxuu u qornaandoonaa hab magaca is xigxiga iyadoo la raacaya xigada iyadoo la tilmaami doono:

1. — Tirada is xigxigta;
2. — Lambarka warqaddaha qoyska;
3. — Magaca, magaca aabaha, midka awoowga iyo haddii ay jiraan naynaas;
4. — Tariikhda dhalashada iyo goobta dhalashada;
5. — Goobta uu deggen yahay.

**Qod. 9**
**Keydinta liiska guud ee murrashaxiinta**

Iyadoo la tixraacayo qodobka sare ku xusan, Duqa Magaalada wuxuu liiska guud ee murrashaxiinta ayaa lagu keydin doona Xafiiska dowladda hoose, kaaso oo nuqullo u diri doona Xeer Illaliya, Guddomiyaha Degmada, Garsoraha Degmada iyo Taliyaha saldhigyada Booliska si ay ugu soo bandhigaan boorarkooda.

Keydka waxaa lagu soo bandhigaya boorar lagu soo dhejin doono keydka dowladaha hoose iyo goobaha dadweynaha.

**Qod. 10**
**Cabashooyinka lid ku ah liisaska guud ee murrashaxiinta**

60 beri ka hor intii aysan dhicin dorashooyinka, muwaadint kasato wuxuu xaq u leeyahay in uu arko liisaaska guud ee murrashaxiinta la soo bandhigay sida ku qoran qodobka sare, kadibna uu cabasho la xiriirta nusqaanka ama tirada : cabashadaasi waa in la hor geeya inta aysan dhamaanin keydinta liiska.

Waxaa go'aanka ugu horeeya ee cabashada oo lagu soo qoray warqado caadi ah ka gaari doona Guddomiyaha Degmada, isagoo la tashtay Duqa Magaalada

Guddomiyuhu waa in uu muddo 5 casho gudaheeda go'ankaasi ka gaara cabasha, haddi uusan ka gaari waayo, cabashado waxa noqon doonta mid la aqbalay.

Muwaadinku wuxuu rafcaan ka qaadan doona go'aanka Guddomiya Degmada, muddo 5 beri gudahooda isagoo u gubin doona cabashadiisa Garsooraha Degmada oo muddo 10 beri ah go'aan ka gaari doono.

Haddii uusan Garsoruhu ku gaari waayo muddadas gudaheeda, cabashadu waxay noqon doonta mid la aqbalay.

**Qod. 11**
**Tiraada iyo liiska kuuraasta – Shahaadada murrashaxnimada**

30 beri ka hor intii aysan doorashada dhicin, wuxuu Duqa Magaaladu ku dhaqaaqi doona:

- In uu qoondeeyo tirada kuurasta, tirada oo aan ka badneynin ilaa 400 oo murrashixiin ah halkii kursi iyo goobahooda;
- In la caddeyo tirada murrashaxiinta ee kursi kasta iyadoo la tixraac qod. 8;
- In la buuxiyo shahaadooyinka murrashaxiinta;
- In ay u tilmaaman Wasaaradda Arrimaha Gudadha, Xeer Ilaaliyaha Guddomiyaha Degmada iyo Garsooraha Degmada tirada iyo goobaha dorashooyinka iyo tirada murrashaxiinta ee kuraasta loogu tala galay.

**Qod. 12**
**Tilmaamaha muhimka ah ee shahaadooyinka doorashada**

Shahaadada doorashada waxaa laga raba inuu tilmaamo:

- Magaca iyo cinwaanka murrashaxa;
- Goobta iyo tiraada goobaha dorashooyinka;
- Maalinta iyo saacada dorashooyinka;
- Tirada liiska dorashooyinka.

**Qod. 13**
**Kala noqoshada shahaadooyinka doorashada**

Muddada u dhexeysa maalinta 30aad iyo maalinta ka horeeeysa dorashooyinka, murrashax kasto wuxuu kala noqon karaa shahaada dorashooyinka, isagoo si toos tegi doono Dowladda Hoose isagoo raaci doono amarrada uu Duqa Magaalada.

Waa loo ogol yahay in murrashaxu uu la noqdo shahaada xaaskiisa.

**Qod. 14**
**Guddoonka shahaadada doorashada ee aqalkaaga**

Isla muddadaas ku xusan qodobka kor ku qoran, kadib markii uusan si toos ah u tegi Karin xafiiska Dowladda Hoose, wuxuu codsan karaa in shahaadada doorashada loogu soo diri aqalkiisa.

**Qod. 15**
**Bandhigga la xiriira shahaadooyinka doorashada**

Sida lagu caddey qodobada 13 iyo 14, murrashaxiintu waa in lagu wargeliyo bandhigyada lagu dhejiyo booraardka dowladda hoose iyo goobaha dadweynaha.

Nuqul boorkaasi waa in loo diraa Xeer-Illahiya, Guddomiya degmada iyo Garsooraha Degmada.

**Qod. 16**
**Luumista Shahaadooyinka doorashada**

Haddii uu shahaado dorasho ay dhunto amas ay noqoto mid aanan anfac lahayn, murrashaxu wuxuu xaq u leeyahay, in sago si toos ah u tegaaya xafiiska dowladda hoose, ilaa iyo maalinta ka horeysa dorashooyinka in uu helo shahaado kale, taas oo Xaffisku caddeyn doono in ay tahay nuqul oo ay ku qoran yihiin liiska murrashaxiinta loogu tala galay kursigaasi.

**CINWAANKA 3AAD**
Murrashaxinta

**Qod. 17**
**Shuruudaha murrashaxiinta**

Waxaa loo dooran kara La-Taliye Maamulka Dowladda Hoose murrashax lab ama dheddig ah oo laga helo shuruudahaan:

1) In sanadka dorashooyinka uu da’a ahaan jiro 25 sano;
2) In ay afka Carabiga ama Talyaaniga qori iyo akhri karaan;
3) In aanan weligood lagu xukmin xukun ka badan 3 sano dembi ciqaab ah.

**Qod. 18**
**Shuruudaha murrashax ka reebaaya in la doorto**

Ma loo doran karo murrashax haddii:

1) Uu yahay garsoore;
2) Uu yahay askari;
3) Uu yahay askari u eke;
4) Xeer-ilaliye, Guddomiye degmo ama shaqalaha Gobolka iyo Degmada oo Maamulka Dowladda Hoose ee markaas la joogo;
5) Ma ka noqon karaan isla waqti isla Maamulka Dolwadda Hoose, walaalo am acid waalid isku ah.

**Qod. 19**
**Is qilaafka xilaalka**

Xilka La-Taliyaha Dowladda Hoose ma qaban karo hadii uu qofku yahay xubin ka tirsan Golaha Xeer Dejinta ama Guddiga Deegaanka.

Ciddi isago jagoonki Xildhibaan ama La-Taliye Guddiga Degmada ee la doorto wuxuu xaq u leeyahay in uu kala doorto.

**Qod. 20**
**Liiska Murrashaxiinta**

Murrashaxiintu waxaa la isgu geyn kara koox-koox aan ka yareeyn tirada la doonaayo in la doorto haddana aan ka badneeyn laba jiibaarka sida uu carifay qod. 7 ee Xeer-nidaamiyaha lamb. 9 ee sharcig soo baxay 30 Seteembar 1956.

Liisasku waa in carifaan magaca, aabaha iyo awoowga, taariikhda iyo goobta dhalashada iyo haddii ay jiraan neynaasta murrashaxiinta.

Magacyada murrashaxiinta waa in ay u qoran yihin si isku xig-xigta iyadoo la dhowraayo sidii ay u soo kala horeeyen.

Murrashnimada waa in lagu aqabala hab qoraal ah oo ay saran tahay saxiixa Guddomiyaha Degmada ama hadduu meel kale deggen yahay Duqa Magaalada.

**Qod. 21**
**Magaceynta Liisaska**

Liisaaska murrashaxiinta waa loo bixin kara magac.

Magacaasi ma noqon karo mid ku saleeysan qabil iyo isir.

**Qod. 22**
**Xaqiijiyaasha liiska dorashooyinka iyo kuwa meteli karo**

Liisasku waa in Duqa Magaalada ama ciddii meteelaaya, ay xaqiijiyaan dirrada murrashaxiinta oo aan ka yareeyn amad aan ka badneyn kuwa hoos ku qoran:

— Dufcadda A: ugu yaraan 2000 – ugu badnaan 300;
— Dufcaadda B: ugu yareen 100 – ugu badnaan 150;
— Dufcadda C iyo D: ugu yareen 100 – ugu yaraan 75.

Xaqiijiyaashu waa inku qoran liiska murrashaxiinta degmada , hal liis ka bandanna ma xaqiijin karaan.

Liiska waa in ay ku caddahay magacyada iyo cinwaanka kuwa waakiilka ka ah:

1. — In ay geeyaaan liiska;
2. — In ay fuliyaan fal kasto oo loo baahan yahay si uu hirgalo.

**Qod. 23**
**Keydinta ku meel gaarka ah**

Hor keenida liis kasta waa in ay wehlisaa lacagta keydka ah ee 500 Shilling haddii ay khuseeysa Maamulka ee dufcadda C iyo D iyo Shilling 3.000 ee Maamulka dufcadda A iyo B.

Lacagtaas keydka ah waxaa loo celin doonaa haddii liiski uu gaaro tirada codeynta ee loo baahdo xeendaadba La Taliyaha, haddii uu gaari waayo lacag taasi waa lagala wareegay.

**Qod. 24**
**Astaamoyinka liiska murrashaxiinta**

Liiska murrashaxiintu waa in uu leeyahay astaamaha gaar ah moo iyadoo 4 nuqul laga soo dhigay loo soo gudbiyaa. Astamooyinka ma loo baahna in lagu qaldo kuwa horay u soo jiray ama xisbiyaal kale ay leeyihin.

Wuxuu noqon karaa mid sawirle ah Looma baahna in ay lahaadaan tilmaamooyinka iyo calaamoyinka ama calamaka dalal ajnabiga ah ama lahaadan astamo qabiil.

**Qod. 25**
**Qoraallada dheeradka ee loogaga baahan yahay liiska murrashaxiinta**

Haddii aysan qodobada sare ku xusan tilmaameynin, waxaa laga rabaa liisasku in ay wehliyaan qorallada hoos ku qoran;

1. Caddeynta Duqa Magaalada in saxiixyada saran liisasku ay yihiin kuwii dad ku qoran liiska doorashooyin, isaga am acid meteleeysan hortooda ay ku saxiixeen;
2. Caddeynta Duqa Magaalada in murrashaxiintu ka mid yihiin dadka xaqqa u leh codeynta xeendaabka deegaank kuwas oo soo buuxiyey shuruudaha ku tixan faqradaha 1 iyo 2 ee qod. 17, kuwaas oo aanan ku jirin marxalad aan la dooran Karin sida ku xusan qod. 18;
3. Caddeynta murrashahaoo ku aqbaalayo murrashnimadiisa isagoo saxiixisu laga xaqiiyaye sida u tilmaamayo qod. 20.

**Qod. 26**
**Bandhigga liisaska**

Liisaska murrashaxiinta waa in la horgeeya Guddomiyaha Deegmada  ama ciddii uu isago ku tilmaamay in ay meteleeyso ilaa iyo 12 duhurnimo ka hor 55 beri maalinta uu dhici doono dorashooyinka.

Sida loo kala hor keenay liisasku waxay yeelan doonaan lambaro isku xig xiga, waxaa la siin doona warqadda in laga guddomay.

**Qod. 27**
**Howlaha daaha iyo liisaska la soo celiyo**

Haddii kadib markii la horgeeyo Guddomiyaha liiska murrashaxnimadu aysan dhameeystirneeyn sida ay qorayaan qodoba sare ku tilmaaman, waxaa loo qaban doonaa muddo 5 beri si uu u soo kaamilo, haddii laakin ay suurtobi weyso muddadas gudaheed, liiska qabashadiisa waa la diidi doona.

**Qod. 28**
**Nuqullada liisaska**

45 beri ka hor intii aanan la qabanin dorashooyinka, Guddomiyaha Degmada wuxuu u soo gudbin doona Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Xeer-ilaaliya, Garsooraha Degmada iyo Duqa Magaalada nuqul liisaska soo gaaay oo buuxiyey shuruudaha iyago lambar isku xig xiga sita, iyadoo la caddeeyey tira murrashaxiinta, tirade kuraasto lagu tartami doono iyo cidda mas’uulka ka ha liis kasta.

**Qod. 29**
**Bandhigga liisaska murrashaxiinta**

Guddomiyaha Degmada wuxuu 30 beri ka hor intii aanan dorashooyinka la gelin soo bandhigi doona boorarka ay ku qoran yihiin liiska murrashaxiinta oo isku xig-xiga kuwaas oo loo gudbin doono si loo gaarsiiyo dadweynaha qeybaha boorarka ee xafiiska Duqa Magaalada, goobaha kale ee dowladda hoose iyo goobaha kale ee dadweynuhu isku arkaan si loo faafiyo.

**Qod. 30**
**Wakiiladaha liiska**

Sida uu farayo qod. 22,wakiiladauhu waxay xaq u leeyihin 1 wakiil lii see kursi kasto oo tartan ku jiro ee Xafiiska Dorashooyinka, kuwaas oo laga soo dhwx bixin doono liiska dorashooyinka.

Wakiilkaasi wuxuu xaq u yeeshay in uu ka qeyb qaato falalka la xiriira kursiga tartanka loogu jiro ee loo qoondeeyey. Wax kasto oo sheego wakiilkaasi waa in lagu qora warcelinta.

Sida lagu farayo qod. 26, wakiilashada cidda metelaysa waa in la horgeeya 10 beri ka hor intii aysan dorasho dhicin xafiisa Guddomiyaha Degmada ama cidii u u wakiisho, kaas oo guddonsin doono warqdaha aqoonsiga ah.

**CINWAANKA 4AAD**
Goobaha Dorashooyinka iyo Xafiisyada Dorahooyinka

**Qod. 31**
**Goobaha dorashooyinka**

Goobaha doorashooyinku waxay lahaan doonan Guddomiye iyo 2 Kormeere kuwas kii da’weyn uu noqon doono Guddomiye ku xiggen.

Goob kasto waxay yeelan doonta Xoghaye.

Guddomiya iyo Kormeerayaashu waxaa laga soo xuli doona dadka cod biyeeyaalka ah sidoo kale Xoghayaha.

Kullikood waxaa kadib markii lala tashtay Duqa Magaalada magacaabi doona Guddomiya degmada isagoo si diyaariyey ciddi beddeli lahayd haddii ay dhibaato ku timaado.

Magaacbidda waa in la ogeysiiyaa dadka ay khuseeyso muddo 10 beri ka hor intii uusan doorashadu dhicin.

**Qod. 32**
**Beddelidda xubnaha iyo Xoghayaha Goobta dorashooyinka intii ay socoto howsha dorashooyinka**

Haddii loo baahdo in la beddelo xubno ama Xoghayaha goob doorashooyin ka socdaan, waxaa beddeli karo Guddomiyaha goobta isagoo ka xulan doona dadka haysta shuruudaha loogaga baahan yahay.

**Qod. 33**
**Xafiiska dorashooyinka ee xeendaabka ka tirsan**

Xafiiska dorashooyinka ee ka tirsan xeendaabka wuxuu yeelan doona Guddomiye , 2 xubin iyo Xoghaye.

Waxaa ka tirsanaan doona dadka fulin doono howsha tirinta codadka. Xubnahasi waxa ahaan karan kuwo ka tirsan cod bixiyeyaal laakin Xoghayaha iyo dadka tirin doono codad shardi ma ahan in ay ahaadan cod bixiyeyaal.

Kulligood iyadoo lala tashtay Duqa Magaalaha ayaa Guddomiya Degmada uu magacaabi doonaa isago weli si diyaar saday ciddii lagu beddeli lahaa haddii loo baahdo

Haddi ay dhalato baahida intii ay socoto howlaha doorashooyinku,waxaa lagu beddeli kara qofka waakiil ka ah sida uu tilmaamayo qod. 26.

**Qod. 34**
**Xafisyada dorashooyinka ee degmada**

Degma kasto waxay yeelan doonta xafiiska dorashooyinka ee degmada oo ka kooban Guddomiye kaas oo noqon doono Garsooraha Degmada 2 xubin iyo Xoghaye
2 qofood oo u qaabilsan tirista codadka waxay iyaguna ka kooban yihiin isla xafiiskaasi

Xubnahasi waxaa laga soo xuli doona dadka cod-bixiyeyaalka, laakin Xoghayahu iyo kuwa tiriya codadka haddi la rabo ma noqon doonan cod-bixiyeyaal

Kulligood waxaa magacaabi doono Xeer Ilaaliyaha isagoo diyaarsan doono ciddii bedeli lahayd haddii loo baahdo.

Haddii ay dhacdo arrimo xanibi karo in bedelidda xubnaasi uu sida kor ku qoran u dhici waayo waxaa yeelaanayo awooda magacabiistoda Guddomiyaha Degmada.

**Qod. 35**
**Waajibaadka xilka – Dhaarta**

Xilaalka halkaan ku tixan waxay leeyihin mas'uuliyad adag.QOfna kama reebana mana laga dhaafi karo waajibaadka xilkaas la xiriira. Intii uusan qofka xilka goobta doorashada ama Xafiiska doorasha waa qasab in Qaali ama Garsooraha Degmada hortiisa uu maraa dhaartaan:

*Waxaan ku dhaaranayaa magaca Illahay in aan u gudan doono xilkeeyga howaha doorashooyinta si daacad iyo kalsooni iyo amigo dhowri doono sharciga'* .

**Qod. 36**
**Shuruudaha loogaga baahan yahay ciddii ku howlan dorashooyinka – Iska horimaad**

Cid kasto eek u howlan doorashooyink ee goobaha ama xafiiska dooroashooyinka iyo wakiiladah liiska waxay sida sharcigaan qabo ilaa iyo intii lagu jiro waqtiga doorashoouinka waxaa ay la mid yihiin saraakiisa dowladda.

Xilkaasi ma qaban karaan murrashaxiinta, militariga iyo kuwa u dhigma militariga, madaxda xeendaabka maamulka iyo Duqa Magallada iyo kalkaaliyaasha.

**Qod. 37**
**Abaal mariinta ciddi ku howlan goobaha iyo xafiisyada dorashooyinka**

Ciddii ku howlan goobaha iyo xafiisyada dorashooyinka waxay heli doona gunnoyinkaan:

— Guddomiyeyaalka 30 Sh
— Xoghayeyaalka- xubnaha xafiisyada dorashooyinka, kuwa ku howlan Tiriska codadka 25 Sh
— Kormeerayaasha 15 Sh

Gunnadaasi waxay soconeysaa inta ay ku howlan yihiin dorashooyinka.

Waxaa kale ee leeyihiin gunno maalinle ah inta ay ka maqan yihiin goobta ay ku noolayeen shaqadaan awgeed:

— Guddomiyeyaalka 20 Sh
— Xoghayeyaalka-xubnaha xafiiska dorashooyinka iyo shaqaalaha tiriya codadka 15 Sh
— Kormeerayaasha 10 Sh

## CINWAANKA 5AAD

Isxayeesiinta Dorashooyinka

### Qod. 38
### Qaabka is Xayeesiinta

Is xayeesiinta dorashooyinka waxay bilaaban karta 30 beri ka hor intaa uusan doorashadu dhicin.

Maalinta ka horeysa dorashooyinka iyo maalinta lagu guda jiro dorashooyinka waxaa reeban is xayyesinta tooska iyo midda dadban.

### Qod. 39
### Isusoo bax iyo banana bax

Amar-sharci lamb. 1 ee 20 Febaraayo 1954 ayaa xadiidaaya shuruudaha isusoo baxa xayeesiinta dorashooyinka iyo banana baxyada.
Isla hal goob oo ka tirsan isla xeendaabka dowlada hoose laguma qaban kara isla hal maalin 2 dhacdo oo ka mid yihiin isusu bax, shirar iyo banana baxyo.

### Qod. 40
### Boorarka iyo warqadaha isxayeesinta

Booraarka iyo warqadaha is xayeesinta dorashooyinka waa in nuqulaadooda la geeya ugu yaraan 24 saac ka hor xafiiska Degmada ama cidii loo xilsaaray sida ku cad qod. 26.

Wax canshuur ah ma ku waajibto.

Laguma dhejin karo boorarka is xayeesinta goobaha diiniga ah.

### Qod. 41
### Labiska

Waxaa reeban in la xirto labista militariga ama kuwa u eg oo lagu qaldami karo.

## CINWAANKA 6AAD
Codeynta

### Qod. 42
### Qolka doorashada

Qolka doorashadu ka dhaceysa iyo qalabka yaala waa in ay ku haboon yihin howlaha dorashada.

Waa ay leeyihiin 2 xarumood si loo suggoin si sir ah doorashada ay ku dhacdo.

### Qod. 43
### Gelitaanka qolka doorashada

Waxaa qolka doorashada geli kara oo keliya kadib markii laga reebo xubnaha goobta iyo wakiiladaha liiska cid kasto oo xaq u leh in uu cod bixiyo.

Kullanka codeynta waa in qof qof loo gala waxaana reeban in la qaato hub ama qalab kale oo dhibaato keeni kara.

### Qod. 44
### Awooda Boolisnimda ee Guddomiyaha goobta doorashada

Guddomiyaha ayaa iska leh barista kullanka goobta dorashada Wuxuu amri karaa booliska in ay ka bixiyaan amaba xiraan ciddii qalqal gelineyasa hab u socota howlaha doorashoyinka ama fal dembi geysta. Xubnaha ciidanku sooma geli karaan goobta doorashada haddii uusan marka hore Guddomiyihu codsanin.

Xubnaha madaniga ah iyo madaxda ciidamada waa in ay u hoogan sanadaan codsiga Guddomiyaha si loo fududeeyo howlaha cod bixinta ama laga hortago turtuurnashada agagaarka goobta doorashada.

Guddomiyuhu wuxuu amri kara in laga qaado warqadda coddeynta ciddii si kas ah waqtiga ku lumineysa qolka dorasha, waxaana loo ogolaan kara oo keliya in uu codkiisa bixiyo kadib markii inta joogta ay codeyso. Arrintaasi waa in lagu qoraa warbixinta.

### Qod. 45
### Guddoominta qalabka doorashada ee Guddomiyaha

Guddomiyaha Degmada ama ciddi uu ku wakiishay sida uu qabo qod. 26, waa in uu guddonsiiya 6 galabnimo ee maalinta ay bilaaban doono doorashooyinku Guddomiyaha goobta doorashada, isla goobtaasi isagoo jooga, santuuq xiran oo ay ku jiraan qalabkaan hoos ku tixan:

1) Bashqad xiran oo timbaraha goobtu ay ku jirto;
2) Bashqad xiran oo ay ka buuxaan warqdaha dorashooyinka;
3) Sanduuqa doorashada;
4) Sanduuqa warqadaha dorashooyinka;
5) 2 nuqul ee liiska murrashixiinta;
6) 2 nuqul ee dadka codbixin karo goobtaan oo uu soo oggolaaday Guddomiyaha Degmada ma ciddii oo ku wakiishay sida ku qoran qod. 26;
7) Nuqul magacaabista xubnaha goobta doorashada;
8) Nuqul fassaxada ay soo gudbiyeen wakiiladaha liiska;
9) Qalman iyo intii qalab xafiis ee howsha lagu geli lahaa;
10) Dhalo qadda aan tirtirmaynin.

Guddomiyaha Degmada waxaa kale oo uu guddoonsiin doonaa qalabka ay xafiisyada doorashada ee xeendaabkiisa ku yaala ay u baahdaan.

**Qod. 46**
**Shabadda, warqadaha coddeynta, sanduqyada**

Shabaddaha goobaha doorasha iyo xafiisyada dorashooyinka, warqadaha codeynta, sanaadiqda iyo qaanadaha waxay noqon doonaan nooc u gaar ah dalka waxaan bixin doono Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Shabadaha waxay leeyihiin lambaro gaar ah oo is xigxiga.

Warqadaha codeynta waxay leeyihin midab isku cayn ah waxayna wataan sawirada liisaska sida ay u soo kale horreyeen.

**Qod. 47**
**Habeynta goobta doorashada – furridda cod bixinta**

Kadib markii uu Guddomiyaha goobta doorashada helo qalabka ku tilmaaman qod. 45 wuxuu:

1) Ku dhaqaaqi doona in uu habeeyo goobta doorasha isagoo u yeeraayo Xoghayaha iyo kormeerayaasha;
2) Wuxuu u yeeri doona wakiilada liisaska;
3) Kadib markii uu husado , kana hubiyo xubnaha kale ee ka tirsan goobta,in ay qufullada saaraan yihin kuwa loogu tala galay wuxuu ku dhaqaaqi doona in uu furo qalabkaasi mar kalena baaro;
4) Kadib markii uu hubsado, kana hubiyo xubnaha kale ee goobta sugnaanta shabadaha saran, wuxuu furi doona bashqadda ay ku jiraan shabadda goobta iyo bashqadda ay ku jiraan warqadaha codeyta, kuwaas oo ku xiri doono khaanadda tirada dadka codbixiyeyaalka ku qoran liiska, isagoo 20 warqadoodo oo dheeraad uu reeban doono . Lambarka gaarka u ah shabadda iyo tirada warqdaha codeynta waxaa lagu qori doona warbixinta;
5) Kadib markuu hubsado, kana xaqiijiyo xubnaha kale ee goobta in sanduuqa doorasha uu yahay mid aan wax ku jirin, wuxuu markale afka ka xiri doonaa isago u banneynaaya meel yar oo laga geliyo warqadaha codeynta;
6) Wuxuu amraaya in lagu dhejiyo derbiyada banaanka ee goobta iyo iridda qolka codeynta booraka murrashaxiinta;
7) Sidoo kale waxaa iyadana lagu dhejin doona derbiga liiska cod-biyeyaalka iyadoo nuqulka kale la saari doono miiska dhex yaala goobta;
8) Wuxuu u gudbin doonaa inta hartay ee qalab ah Xoghayaha;

Arrimahaasi oo dhan waa in si dhaqsi leh loo gutaa oo si deg-deg ah loo furaa howlaha coddeynta.

**Qod. 48**
**Aqoonsiga Codbixiyaha**

Goob kasto waxaa xaq u yeeshay in uu ka codbixiyo ciddii:

1) Ku qoran liiska cod biyeyaalka goobtaasi;
2) Xubnaha howlwadeenada ah, wakiilada liiska, Saraakiisha iyo askarta ciidan ku howlan goobtaaasi, xattaa haddii ay ku qoran yihiin goobo kale, lakiin ka wada

tirsan isla xeendaabka dowladda hoose, kuwaaso ku biiri doono liiska dheeraadka ah.

Caddeynta in qofkuu leeyahay xaqqa in uu codbixiye noqdo waxaa lagu gaaraya kadib markii la baaro warqadaha aqoonsiga, ama marqaatiyaalka ama wixii kale oo lagu caddeyn karo markii laga reebo marxalada ku qoran qod. 61.

Codbixiyuhu waa in uu saraa farta suulka ah oo la geliyey qadda aan tirtirmeynin kadib markii uu sheegto tilaamihiisa gaarka ah.

Haddii uu codbixiyuhu uusan lahayn farta suulka ah ee gacanta midig wuxuu saari doona suulka gacanta bidixda ah.

Haddii uu codbixiyuhu lahayn suulasha labada gacnood, waxaa shabad loo saari doona qad aanan tirtirmeeynin garabkiisa.

**Qod. 49**
**Amarro u gaar ah militariga iyo kuwa u eg**

Militariga iyo kuwa u qaab sameeysan sidii military, waxay ka soo qaadan karaan shahaadooyinkooda cod bixinta madaxa ay hoos yimaadan.
Waxaa ka reebaan militariga iyo kuwa ku qaab sameeysan in ay hub la soo galaan qolka dorashooyinka haddii uusan saas codsanin Guddomiyaha goobta dorashooyinka.

**Qod. 50**
**Cod bixiyeyaalka oo aan in si toos ah u codeeyaan**

Codbixiyeyaalka waxaa laga doonaya in ay yimaadan goobta doorashooyin oo ay codkooda ku ridaan sanduuqa. Haddii ay u surto geli weyso sababo la xirira cafimaad, taasna ay wada ogyihiin xubnaha ku howlan doorashada, wuxuu Guddomiyaha goobto u oggolaan kara in laga saacido.

Guddomiyuhu waa in arrintaasi ku qoraan warbixinta, isagoo tilmaamaya magaca qofta la saaciday iyo cidda saaciday in uu coddeyo
Waxaa loo baahan yahay in warqad dhakhtareed ee xaaladda caafimaadkiisa lagu soo lifaaqo warbixinta goobta.

**Qod. 51**
**Qaabka codeynta**

Codbixiyeyaalku waxaay u codeyn doonaan hadba sida ay u soo kala horeeyen. Haddii ay isku mar yimaadaan waxaa mudnaanta leh mid ku horreyey liiska dorashada.

Waxaa mudnaanta leh xubnaha goobta doorashada, kuwaa wakiilaada liisaska militariga iyo kuwa u qaabeysan sidii militarigii oo ku howlan doorashada.

Kadib markii la guto howlaha ku tilmaaman qod. 47, Guddomiyhu wuxuu bilaabayaa howsha codeyn isagoo markii la aqoonsaday cod bixiyaa la guddonsiin doono warqadda codbixinta oo laga soo saaray khanadda iyadoo shabbadda goobta gaarka u ah iyo qalin lagu duugay.

Codbixiyuhu waa in uu qaataa warqadda codeynta uuna la gala xarunta loogu tala galay, isagoo xariiqid istilaab ah saari doono godka affar geyska ah ee ciddii uu rabay in uu codkiisa siiyo.

Waxaa reeban in calaamooyin kale la dul saaro warqaddasi.

Kadib waxaa laga rabaa codbixiyaha in uu isku laabo sida ku tilmaaman warqadda iskuna xiro afafkeeda.

Kadib markii oo uu so dhameeysto buxista warqadda codeynta, wuxuu u keeni doona Guddomiyaha isagoo hubinaaya in ay geesahaa ka xiran tahay, oo haddi aysan xirneyn ka codsanaya codbixiyaha in uu xirio, kadibna waxaa lagu ridi doona warqadaasi sanduqa codeynta.

Xubin ka tirsan howlwadeenada yaaa hubin doono in codbixiyuhu gutay waajibkiisa, taaso oo uu ka codsan doono in uu saxiixo magaciisa agtiisaee liiska codbixiyeyaalka.

Warqadaha laga waayo shabbadda ama aanan ku nooc ahayn kuwa loogu tala galay lama aqbali doono (haddii aysan jirin marxalada in ka maqnaashahaasi uu sabab u yahay Guddomiya laftiisa ama xubnaha goobta). Arrintaasi waxaa uu kuur geli doono Kormeeraha oo ku qori doona warbixinta goobta dorashooyinka.

Haddii warqadda codeynta ay noqoto mid xumaatay, wuxuu cod bixiyuhu weydiisan kara Guddomiyaha in mid kale loogu beddelo, iyadoo midda xumaatay gooni loo dhigi doono laguna tilmaami doono mid xumaatay si wada jirna Guddomiyaha iyo Kormeeruhu ay wada saxiixi doonaan.

Warqadda codeynta waxay tilmaameysa in uu leeyahay codbixiye liiska ku jira
Haddii uu codbixiyuhu uusan gelin xarunta loogu tala galay in uu codkiisa ku soo qoro warqada codeynta waxay noqoneysa mid aan waxba ka jirin; mana loo oggolaan doono in mar kale uu codbixiyo.

Ugu yaraan 2 qofood waa in ay xaadir ku yihiin goobta dorashooyinka kuwaas ah Guddomiyaha ama Guddomiye ku xigeenta.

### Qod. 52
### Waqtiga howlaha dorashooyinka

Howlaha dorashooyinka waxay si joogta u socon doonan laga bilaabo sacaadda 6 ilaa iyo sacadda 20. Codeynta waa in loo oggolaada ciddii hortaagan goobta doorashada sacadda 20 markii ay tahay.

### Qod. 53
### Caddeyn hor dhac ah eek u meel gaar ah ee Guddomiyaha

Guddomiyaha isagoo la tashtaya Kormeerayaasha wuxuu si ku meel gaar bixin karaa warbixin hor dhac ah, iyadoo la dhowraayo qod. 61 ee howlaha codeynta natiijada codeynta iyo codeynta wax kama jiranka noqday.

## CINWAANKA 7AAD
Tiraakoobka Warqadaha Codeynta iyo ku Dhaqaaqidda Natijooyinka

### Qod. 54
### Howlaha hordhaca ah

Kadib markii uu dhammato howlaha codbixinta, Guddomiyuhu wuxuu amrayaa in laga nadiifiyo misaaska goodba doorashooyina wax kasto aan aanan logaga bahneyn tirista codadka iyo baaristooda:

1) Wuxuu ku dhawaaqi doona in howlaha codbixintu ay idlaatay;
2) Wuxuu xaqiijinaya tirada cod bixiyeyaalka ku qoran liiska;
3) Wuxuu xisaabin doona tirada shahaadooyinka;

4) Wuxuu soo bixn doona warqadaha codeynta ee aan la isticmaalin isagoo ku cabbirayaha tirada codbixiyeyaalka aan soo celin warqadahooda codeynta ama kuwa nooc kale amase anaan lahayn shabaddada loogu talaga iyo tirada la fiilaayo in laga helo sanduuqa codeynta;
5) Wuxuu ku uruurin doona bashqad gaar (lamb1):
   — Warqdaha codeynta oo loo diyariyey laakin aan la isticmaalin;
   — Warqdaha aan la isticmaalin ee laga helay Guddomiyaha Degmada;
   — Shahaadooyinka codeynta oo laga soo uruuriyey codbiyeyaalka;
6. Wuxuu isaga iyo qof kormeere ah wada saxiixi doona liisaska codbiyeyaalka ku qornaa goobta doorashooynka wuxuuna ku uruurin doona bashqada lamb. 2,
7. Wuxuu kale oo isaga iyo qof kormeere ah waxa saxiixi doonan warqadaha codeynta oo laga soo ururiye codbiyeyaalka kuwaas oo sida ku cad qod. 51 ahayeen kuwa xumaaday amad wato shabbad ka duwan midda goobta doorashooyina wuxuuna ku uruuri doona bashqadda lamb. 3.

**Qod. 55**
**Tirista iyo barista warqadaha codeynta**

Kadib markii uu Guddomiyuhu dhameeyo howlaha ku tilmaaman qod. 54:

1) Ku dhaqaaqi doona howshad tirista warqadaha codeynta Sidaas awged qof kormeera ah ayaa mid mid u soo bixin doono warqadaha codeynta isagoo u dhiibaya Guddomiyaha. Kaas oo si cod dheere ku dhawaaqi doono cidda loo codeyey, wuxuu tusi doona warqadda codeynta wakiiladaha liisaska wuxuuna u gudbin doona kormeeraha kale, kaas oo isagoo wehliyo Xoghayaha ku qori doono boorka loo tala galay.Xoghayuhu cod dheer ayuu ku sheegi doona cidda loo codeyey, kormeerahaa wuxuu gelin doona warqadda codeynta sanduuqa loogu tala galay. Warqadda codeynta waxaa taaban karo oo keliyaxubnahaha ka tirsan goobta doorashada ;
2) Guddomiyuhu wuxuu hubsanayaa in warqdaha codeynta ee la tiriyey ay isleeyhiin tirada dadka codeeyey, tirade guud eek u qornaa liisaaska ay murrashixintu soo gudbiyeen, codadkaxumaaday amad la baabiyey oo aanan qeybin;
3) Wuxuu hubsan doona islaahanshada tirade codbiyeeyalka lagu qoray warbixinta haddii wax iskhilaaf ah jiran waa in uu ka warbixiyaa sababta;
4) Wuxuu isaga iyo qof kormeere ah wada saxiixi doonaan:
   — warqadha codeynta oo xumaday ama dood ka dhalatay sida ku cad qod. 57;
   — warqdaha la xiriira cabashada wuxuuna ku aruurin doonabashqadda lamb. 4.
5) wuxuu ku uruurin doon bashqadda lab. 4 warqdaha kale oo la tiriyey;
6) kadib markii oo uu hubsadao, wuxuu caddeyn doonata tirade codebiyeyaalka; codadka saxda ah iyo codadka liisasku ay heleen.

**Qod. 56**
**Hababka kala Duwan, Warcelinta iyo Bashqadaha**

Howaha laagu tilmaamay qod. 54 iyo 55 waa in loo fuliya si aan kala jogsi lahayn iyo sida ay isugu xigaan.

Howlahasi iyado waxba laga dhimin waa in lagu qoraa warbixinta Bashqadaha ku tilmaaman qod. 54 iyo 55 waa in ay noqdaan kuwo lagu shabbadeydy boggiooda sare

iyadoo saxiixa Guddomiyaha iyo ugu yaraan hal kormeere la saaray. Bashadaasi waa in wixii ku jira dhexdooda lagu tilmaama boogga sare.

**Qod. 57**
**Codadka wax ka jiraan ah, ama fooda u saran in la baa'biyo ama kuwa muran ka taagan yahay**

Waxaa wax kama jiraan ah warqdaha codka ee:

— muqaal ahaan ka duwan kuwa goobta doorashada;
— kuwaa aan lahayn shabbada goobda doorashada;
Waxaa ah kuwa aan la aqabli doonin;
— haddii ay leeyihin caalamooyin iyo far qoraal ah oo lagu qorqoray;
— haddii aan la fahmi Karin ciddi loo codeeyey ama liiska uu ka yimid codbiyahu

Warqdaha codeynta ee noocani ah waxaa si wada jir go'aan uga gaari doono iyado lala tashtaty wakiilahada liisaska ee xaadir ku ah goobta doorashoyinka; Guddomiyaha goobta iyo 2da kormeere.

Haddii uu muran ka dhasho go'aankaasi, warqada doorashada oo la isku qabsaday waxaa go'aan ka gaari doona Garsooraha Degmada.

**Qod. 58**
**Dib u dhigidda howlada tirista iyo baarista**

Haddii ay suurto geliweyso in howlaha tirista iyo barista warqadaha codeynta in isla maalintii ay doorashadu gabagabowday la qaban waayo, wuxuu Guddomiyuhu amraya in lagu qufullo darashadaha iyo albaabka qolka dorashooyinka qufullo gaar, iyadoo lagu xanaanayo wax kasto oo la xiriray warqadaha codeynta, kuwaas oo haddii aanan la isticmaalin la tirin doono, laguna qori doono galka warbixinta tiradooda waxaana lagu xiri doonaa sanduuqa sida uu tilmaamayo qod. 45. Qolka doorashooyinku waxaa ilaala joogta ah ka hayn doono xubnaha ciidanka.

Howlaha tirista iyo baaristu waxay bilaaban doonan maalinta ku xigta iyagoo howlwadeenanadu ay u soo xaadiri doonaan goobta doorasha**.**

**Qod. 59**
**Galka warbixinta goobta doorashada**

Galka warbixinta ee goobta doorashada waa in loo qoraa hab laba nuqul leh.

Galka kowaad oo ay ku lifaaqan yihiin lifaaqyada lagu iilmaamay warbixinta waxaa lagu wareejin doona sida qod. 45 qabo Xafiiska dorashooyinka ee xeendabka dowladda hoose, si loo dhameeystiro howlaha ku tilmaaman qodobka soo socda. Nuqulka labaad waxaa la gaarsin doona Duqa Magaalada.

**Qod. 60**
**Howlahad Xafiiska dorashooyinka ee xeendaabka dowladda hoose**

Xafiika dorashooyinka ee xeendahku, wuxuu kadib markii la soo gaarsiyo galalka warbixinaada ee dhamman goobaha dorashooyinka, wuxuu xisaabin doona tirada codbixeyaalka ee goobaha oo dhan, wuxuuna caddeyn doona tirade liisaska oo dhan isagu isku shandeyey codadka saxda ah ee goob kasta.

Guddomiyuhu wuxuu hubsanayaa wuxuu caddeynaya natiijooyinka baaritaanka wuxuuna qorayaa warbixin oo 3 nuqul ah.

Hal gal warbixineed oo ay wehliyaan warbixintii kowaad iyo qoraalladii laga soo diray goobta dorashooyinka waxaa loo gudbin doona xafiiska dorashooyinka ee Degmada.

Warbixinta labaada waxaa loo diri doonaa Guddomiyiha Degmada, warbixnta seddaxaadna waxaa si toos ah loogu diri doona Xeer-Ilaaliyaha.

**Qod. 61**
**Howlaha Xafiiska dorashooyinka Degmada iyo ku dhawaaqidda ciddi guleestay**

Xafiiska dorashooyinka degmada wuxuu qaabilayaa warbixinadda xafiisyada doorashooyinka ee xeendabka hoos yimaada iyo qorallada la xiriira
Sidas awgeed, Garsooraha Degmada, oo ay taakuleynayaa xubnaha Xafiiska ee mamuladda dowladda hoose wuxuu:

1. Wuxuu xisaabinaaya tirade codbixiyaalka liis kasta isagoo isku dardaaraya tirada codadka sax da ah ee goobaha oo idil;
2. Wuxuu go’aan ka gaaraya warqadaha muranka ka taagan yahay sidas uu dib u sixi doona natiijada,
3. Wuxuu ku saleeynaya tirada codbixiyeyaalka iyo tirada murrashiinta isagoo u qeybiyey tiradaas dadka laga rabo in la soo doortay;
4. Wuxuu u qeybin doona goob kasta ee dorashoadu ka dacday si loo xalilo tirada murrashiixinta, haddii goobaha qaakood ay dhaafan tirade loo tala galay waxaa lala dheeli tiri doona kuwaa aan soo gaarin tiradaasi, haddii ay barbar dhac yimaado waxaa la adeeysan doona bakhtiya nasiib;
5. Wuxuu ku dhawaaqayaa ciddi ku guleesatay iyadoo la tixraacayo habka ay ugu kala horreyaan liiska iyo kuraasta lagu tartamaaayey;

Haddii uu lisku ahaa mid qura, waxaa wada guleysan doono murrashiinta ilaa iyo tartanka tirade la-taliyeesha Maamulka dowladda hoose.

Galka warbixineed oo 3 nuqul ah waxaa loo kala diri doona Garsooraha Gobolka, Guddomiyada Degmada iyo Duqa Magaalada, kaas oo ogeysiin doono dadweynaha ciddii ku guleeysatay.

**Qod. 62**
**U gudbinta qorallada doorashooyinka ee Garsooraha Gobolka**

15 beri gudahoomada maalinti la caddeyey naatijooyinka doorashooyinka waxaa Garsooraha Degmadu u soo gudbin doona galalka warbixinadda iyo lifaaqyada oo dhan ee la xirira goobaha dhan iyo xafiisyada doorashooyinka oo ay wehliyaan qorallada cabashooyinka.

**Qod. 63**
**Ansixidda dorashooyinka**

Garsooraha Gobolka ayaa iska awooda ansixidda dorashooyinka. Isaga ayaa ka gaari doona go’aanka kama dambeeysta ah ee warqadaha muranka galay, cabashadaha ee la xiriira goobaha dorashooyinka iyo xafiisyada muddada ay howlaha dorashooyinku socdeen iyo muddadii ka dembeysay.

Wixii cabasho aha iyo dood ah oo aan loo gudbinin si toos ah Xafiisyada dorashooyinka, waa in loo gudbiyaa Garsooraha gobolka muddo 15 beri kadib maalintii uu Garsooraha degmadu go’aan ka gaaray.

Wax ansixid ah ma jiri karto iyadoo 30 beri aysan ka soo wareegin maalinta ku dhawaaqidda.

**Qod. 64**
**Isku bedelid jago**

Jagada La-taliyaha oo sabab kasto u banaaneyd, waxaa lagu wareejin doona Garsooraha degmada murrashaa ugu dambeeyey ee liiska.

## CINWAANKA 8AAD
Amarrada Guud

**Qod. 65**
**Isku dayid horistaag xorridda is xayeesiinta**

Ciddii isku dayda' iyadoo adeegsaneysa qalab kasto in ay hor istaagto ama qalqal geliso shirarka isxayeesinta, ha ahaado mid guud ama mid gaar ah, amah or istaagta in ladhajiyo boorka ay soo gudbisay dowladda hoose ee la xiriira howlaha dorashooyinka ama ciiriri gelisan faafinta iyo dhejinta waraqaadaha is xayeesinta ama baa'bisa boorarka wuxuu mudan doona ciqaab xarig ilaa 2 sano iyo ganaax ilaa 2,400 Sh.

Isla ciqaabtaasi waxaa mudnaan doona ciddii isticmaasha qalab ama hab aan waafaqsaneyn sharciga.

**Qod. 66**
**Codbixiye oo isku qoray liisas badan**

Lama oggola in codbixiyuhu isku qoro liisas badan, ciddi hal liis ka badan lagu helo in uu ku qoran yahay wuxuu muteeysan doonaa xarig ilaa 1 bil iyo ganaax ilaa 100 Sh.

**Qod. 67**
**Isku dayid in la isku qoro liis iyo xorriyada codeynta**

Ciddii si uu ku helo saxiixa codbixye liiska codbixiyeyaalka ama uu cod ku helo am aka aamuso, u ballan qaada, ama siiya lacag, ama qalab qiima leh ama wax kale oo anfac leh, ama u ballan qada shaqo dowladeed ama mid gaar loo leeyahay wuxuu muteysan doona xarig ilaa 1 sano ama ganax ilaa 1,200 Sh.

Isla ciqaabtaasi waxa mudan doono codbixiyahay oo aqbala ballan qaad ama hela lacag iyo anfac gaar ah si uu u siiyo ama u diida saxiixa codbiyeaha ee liiska murrashaxiinta.

Ciddii isticmaasha xoog, handadaad, qiyaamo ama lab lab si uu u fuliyo falalka ku qoran faqradda 1aad ee isla qodobkaani wuxuu muteeysan doona ciqaabta xarigga ah ee 2 sano iyo ganaax ila 2.400 Sh.

**Qod. 68**
**Isku dayidda falalka lid ku ah habsami u socodka howlaha dorashooyinka**

Ciddii istimaasha shaqaadad ama falal handadaad ah qalqal geliso habsami u socodka howlaha dorashooyinka ama hor istaaga falka xorta ah ee codeynta wuxuu muteysan doona xarig ilaa 2 sano iyo ganax ilaa 2.400 Sh.

**Qod. 69**
**Soo gelidda amar la'aneed ee qolalka dorashooyinka**

Ciddii iyadoon xaq u lahayn, intii ay howlaha dorashooyinku socdaan soo gala qolalka dorashooyinka ee goobta ama xafiisyada, ama diida in uu dibedda ugaga baxo, wuxuu muteysan doona xarig ilaa 1 bil ah iyo ganax dhan 1,200 Sh.

**Qod. 70**
**Codadka qiiyaamada ah**

Ciddii iyado og in ay xaq u lahayn, amase magac qof kale qaata oo damca in uu ku codeeyo goobta dorashada, ama isku daya in goobo badan uu ka codeeyo, isagoo shegaanayo in uu u codeynaya qof aanan imaan Karin, wuxuu muteysan doona xarig ilaa 6 bilood iyo ganaax ilaa 600 Sh.

Isla ciqaabtaasi waxa mudan doono ciddi ku taakuleysa codeynta usan qofku xaq u laheyn ama si qiyaamo ku jirto caddeyna in uu yaqaano codbixiyaha.

Sidoo kale waxaa isla ciqaabtaasi mudan doono ciddi horistaago xaqqa codeynta ama qofkii shahaado qalad ah la yimaado.

Ciqaabtu waa ilaa 2 sano oo xarig iyo ganaax 2,400 Sh.  Haddii falalka ku carifanfaqradaha sare ku xusan ay galeen shaqaalaha dowladda ama ciddii u xilsaaran.

**Qod. 71**
**Soo celin la'aanta warqadda codeynta**

Codbixiyaha aan u soo celin warqdaha codeynta ama jeexjeega ama wasaqeeya si kas ah wuxuu muteysan doona ganaax ilaa 600 Sh.

**Qod. 72**
**Been abuur qoraallada iyo wax ka bedellida dukumentiga dorashooyinka**

Ciddiisi kas ah u been abuura idil ahaan ama qaar ka mid ah liisaska murrashaxiinta ama liisaska xodbiyeyaalka, ama qoraal kasta ee ku xusan Sharcigaan  iyo howlaha doorashooyinka, ama wax ka beddela qorrallada asli ah ama baabi'ya guud ahaan ama qoralladasi, ama isticmaala qoraalladasi been abuurka ah ama wax laga beddelay, xatta haddii uusan qeyb ka ahayn falalkasi wuxuu muteysan doonaa ciqaabta xarigga ah ee ilaa 2 sano iyo ganaaxa 2,400 Sh.

Isla ciqaabtaasi waxaa muqan doono ciddii wax ka bedesha natiijada dorashooyinka.

**Qod. 73**
**Falalka ama ka gaabsiga dhowrista sharcigaan ee xubnaha ka tirsan goobaha iyo xafiisyada dorashooyinka**

Ciddii , iyadoo ka tirsan xubnaha goob ama xafiis dorasho, gasha falalka lagu tixay qodobada sare ku xuan ee isla cutubkaan, waxaa uu muteysan doona ciqaabta u qoran fal dembiyeedkaasi oo lagu kordhiyey ila 3 u dhig hal dhig, haddii uu ka gaabsado ama uu ku kaco falalkaasi lidka ku ah habsami u socodka howlaha dorashooyinku taas oo natiijada qalqal gelin karta wuxuu muteysan doona xarig ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa 3,000 Sh.

**Qod. 74**

**Didmada sabab la'aaned eek a qeyb galka goob ama xafiis doorasho**

Ciddii diida  in ka howl gasho xubin ahaan goob ama xafiis doorasho, iyadoo uusan jirn wax qiil ah, ama ka maqnaada howshiisa maalinta doorashada wuxuu muteysan doona ganaax ilaa 600 Sh.

Isla ciqaabtasi waxaa muteesyan doono xubnihii qiil la'aan isaga dhaqaaqa  gobta ama xafiiska ay doorashadu ka socoto.

**Qod. 75**

**Lumista xuquuqda siyaasadeed iyo xukun tooska ah**

Xukumada ka soo aroora falal dembiyeedka la xiriira dorashooyinka, oo Garsooruhu xukun gaaro aan ka yareen 2 sano waxay ka qaadaayaan dembilahay xaqqa codeynta iyo xaqqa in la doorto ilaa iyo 5 sano.

Xukunkaasi wuxuu noqonayaa mid toos ah.

**CINWAANKA 9AAD**

Amarrada Gunaanadka iyo kuwa ku Meel Gaarka ah

**Qod. 76**

Guddomiyaha Degmada wuxuu koormeer ku suubin doonaa in falalka lagu amray sharcigaan ee Duqa Magaalada ay u fuleen sida laga rabay iyo muddada loo carifay dhexdooda.

Xeer Ilaaliyuhu wuxuu isagan ilaalin doona isku dubaridi doona howlada Guddomiyaalka degmooyinka iyo kuwa Duqa magaalada.

**Qod. 77**

Maamulka Dowladaha hoose e lagu soo dortay sida waafaqsan sharcigaan waxay xilkooda hayn doonana ilaa iyo 4 sano maalinta uu kulanka koowada uu dhacay.

**Qod. 78**

Kullanka kowaad kama daba mari karo 1 bil maalintii lagu dhawaaqay natiijooyinka dorashada.

Taariikhasi waxaa lagu soo carifi doona dekreeto oo Wasiirka Arrimaha Gudaha oo uu soo saaray.

**Qod. 79**

Dowladaha Hoose ee xilka haayey waxay shaqadoodu ku eg tahay 30 June ee 1958, Ilaa iyo intii xubnaha cusub ee Dowladaha hoose ay xilkooda qaban doonaan, waxaa howsha sii wadi doona Duqa Magaalada oo ay wehliyaan kalkaaliyeyaasha oo fulin doono howl maalmeedyada sida ku qoran sharcigaan.

**Qod. 80**

Haddi ay dhacdo in decreetad Maamulka lamb. 7 ee 22 Maarso ee 1958, Guddomiyeyaalka degmooyinka loo xilsaaro in ay noqdaan Garsoore Degmada, howlaha sharcigaani u xil saaray Garsooayaasha degmooyinka waxaa qaban doona ciddii

istahiishataa kaas oo Garsooraha Gobolku uu magacaabi doono isagoo la tashtay Xeer Ilaaliyaha.

**Qod. 81**

Kharajyada la xiriira howlaha dorashooyinka ee maamulka waxaa iska leh dowladda.

**Qod. 82**

Waxaa la buriyey amar-sharci lamb 18 ee 29 Diseember 1953 iyo dekreeto lamb 15 ee 24 Febaraayo 1954 iyo amarrada kale oo aan la jaan qaadi Karin sharcigaan.

**Qod. 83**

Xeerkaani waxa lagu qori doona Keydka Rasmiga ah ee shuruucda oo ay ku soo bixi doonta Faafinta Rasmiga. Waxaa la faraaya in cid kasto in u hoggansanaado, una hoggamiyo dadweynaha.

Muqdisho, 25 Juun 1958.

Ku simaha Maamulka Walaayada
**P. Franca**

Raisul Wasaare
**Abdullahi Isse Mohamud**

Wasiirka Arrimaha Gudaha
**Haji Mussa Boqor**